**EU-IOM**
Joint Initiative for
Migrant Protection
and Reintegration

# Tani waa warqadda xogta barnaamijka caawinaadda dib u isu

# Dhexgalka ee soomaaliya kaas oo hoos yimaadda

# Xayndaabka hindisaha mideysan ee eu-iom ee badbaadinta

# Muhaajirka iyo dib isu dhexgalka

Project funded by the European Union
Project implemented by IOM

**“Hindisaha Mideysan ee EU-IOM ee Badbaadinta Muhaajirka iyo Dib-isu-dhexgalka Geeska Afrika”** waxaa laga maalgeliyaa barnaamijka (EU Emergency Trust Fund for Africa- EUTF). Hindisahan mideysani wuxuu fududeeyaa maamulidda hijro nidaamsan, ammaan ah, hagaagsan oo masuuliyad leh taas oo loo marayo horumarinta hannaan dib u noqosho oo ku saleysan xuquuqo, horumar diiradda saaraya isla markaasna joogto ah. Barnaamijku wuxuu socon doonaa inta u dhexeysa 2017 iyo 2020.

Haddii aad caawinaad ka hesho hay’adda socdaalka dunida (IOM) si aad Soomaaliya ugu laabato adiga oo gacan ka helaya barnaamijka hindisaha mideysan, waxaad halkan ka heleysaa  xog ku saabsan hannaanka dib isu dhexgalka. Fadlan si taxaddar leh u aqri.

## ISLA MARKA AAD TIMAADDO

### DADKA KU IMAANAYA DUULLIMAAD GANACSI AMA MID AA GANACSI AHAYN

Marka aad ka soo degto garoonka diyaaradaha ee caalamiga ah Aaden Cadde (Muqdisho) ama Cigaal (Hargeysa), waxaa ku soo dhoweynaya kuna hubin doona maamulka waaxda socdaalka, IOM ayaduna halkaas ayey joogi doontaa si ay kuu caawiyaan marka aad timaaddo ka dib.

Marka ay kuu soo dhammaato howsha la xiriirta socdaalku, IOM iyo maamulka Socdaalka ayaa kula kulmi doona isla markaasna kuu sameyn doona isdiiwaangelin degdeg ah inta aad joogto garoonka diyaaradaha. Kaddibna waxaa lagu siin doonaa 100 doollar oo sahay ah.

Shaqaalaha IOM ayaa ku siin doona warqad ay ku qoran tahay xogta iyo lambarrada telefoonnada aad la xiriiri karto marka aad la kulanto xaalad degdeg ah- ama u baahato caawinaad- sidoo kalena waxa ay kaa caawin doonaan inaad hesho hoy ku-meel-gaar ah haddii loo baahdo.

Dadka u baahan gargaar caafimaad oo degdeg ah waxaa u howlgali doona Wasaaradda Caafimaadka iyo shaqaalaha caafimaadka ee IOM, haddii laga maarmi waayana waxaa loo gudbin doonaa isbitaal si loogu daaweeyo. Dadka raba in ay meelo kale u sii safraanna waxaa loo diyaarin doonaa socdaal hor leh ayada oo markastana lagaa tala-gelin doono. Marka aad hesho fursad aad ku degto kaddib, IOM ayaa kula soo xiriiri doonta si laguugu waqtiyeeyo ballan aad uga qaybgali karto latalin shaqsi ahaan.

Waxaa intaan soo raaci doona fadhi latalin ah oo aasaasi u ah qorshahaaga dib isu dhexgalka, halkaas oo ay xubin IOM ka tirsan kugu caawin doonto in caddeeyo ama la isla garto adeegyada adiga kuu wanaagsan ama kugu habboon. Ka dibna IOM waxa ay kugu caawin doontaa inaad hesho tababbar xirfado ganacsi ama shaqo, amaba aad koorsooyin waxbarasho ku qaadato xarumaha TVET. Waxaan oo dhan waxaa go'aansan, doona adiga iyo lataliyaha ama ciddi kale ee ka socota dhanka IOM. Tababbarka ganacsiga waxaa loo yaboohaa ama loo soo bandhigaa dhammaan dadka soo laabta ee raba in ay ganacsi sameystaan si loo abuuro fursadda ugu wanaagsan ee ganacsigoodu ku guuleysan karo. Marka uu tababbarku kuu dhammaado, waxaa lagu tusin doonaa sidii aad u horumarin lahayd qorshahaaga ganacsi. Dadka kuwiinna doorta in ay dhabbahan qaadaan si ay u sameystaan ganacsi yar, waxaa la idin kula talinayaa in aad ka fakartaan mashruuc wadareed aad isku darsaneysaan dad aad isku meel ka timideen.

Dhammaan kaalmada ama caawinaadda dib isu dhexgalka ee IOM waxaa lagu bixiyaa 'adeeg' ayada oo lagugu siinayo alaabo ama adeegyo: **lacagta sahayda ah oo kaliya ayaad lacag ahaan ama kaash ahaan u heli doontaa.**

Marka aad timaaddo, waxaa lagaa codsan doonaa inaad bixiso telefoon lambarro la isku halleyn karo kuwaas oo ay IOM kaala soo xiriiri karto. Xitaa haddaad heysato telefoon shaqsi oo shaqeynaya, waxaa wali lagaa doonayaa inaad bixiso telefoon labaad sida lambarka qof aad qaraabo tihiin ama saaxiib kuu dhow.

Xogta kugu saabsan ee aad IOM la wadaagi doonto waxa ay noqon doontaa qarsoodi oo aad ayaa loo xafidi doonaa ayada oo lagu dhaqmi doono Mabaadii'da IOM ee Ilaalinta Xogta.

Xogta aad bixineyso ee ku aaddan meesha lagaa la soo xiriiri karo aad bay muhiim u tahay si aad u hesho caawimaad dheeraad ah sidii loo baahnaa.

**Carruurta yar yar ee aan la wehlin**

- Inta aad joogto xarunta ama goobta aad geshiinka (transit) ku tahay, maamullada gudaha ayaa diyaarin doona foomka go'aansashada sida ugu habboon, waxa ayna fududeyn doonaan dib ugu noqoshada ama dib ula midoobidda qoyskaaga.
- Marka la xaqiijiyo cinwaanka qoyskaaga/ cidda kaa masuulka ah, IOM waxa ay gacan ka geysan doontaa in laguu diro magaalada ama meesha aad deggan tahay si loo dhammeystiro qorshaha aad dib ugu la midoobeyso qoyskaaga.

- Upon your reunification, IOM will work with you and your parents/guardian to establish how to utilize your reintegration grant. The grant is intended for expenses related to your school enrollment and for other educational expenses, medical needs and well-being costs.
- Isla marka aad qoyskaaga hesho oo aad dib uga mid noqoto, IOM waxa ay adiga iyo waalidkaa/cidda kaa masuulka ah kala shaqeyn doontaa sal u dhigidda iyo isticmaalka mashruuca loogu tala-galay dib u soo noqoshadaada iyo dib u soo dhexgalkaaga bulshada. Mashruuca waxaa laga bixin doonaa qarashaadka ku bixi doona iskuul ka qoriddaada iyo qarashyada kale ee waxbarasho, baahidaada caafimaad iyo guud ahaanba bedqabkaaga.

## MARKAAD TIMAAD KADDIB

### Latalin

Muddo 30 maalmood gudahood ah oo ka billaabato markaad soo laabatay, fadlan kala xiriir xafiiska IOM ee Soomaaliya lambarradii lagu siiyay markaad garoonka diyaaradaha joogtay. Haddii aadan la soo xiriirin IOM Soomaaliya muddo 3 bilood gudahood ah kana soo billaabato imaanshahaagii, laguma siin doono caawimaadda dib isu dhexgalka.

IOM waxa ay kuu habeyn doontaa fadhi latalin ah. Fadhigan latalinta ah ayaa looga golleeyahay in looga hadlo laguna qorsheeyo dib u soo noqoshadaada iyo qorshahaaga dib isu dhexgalka. Latalinta dib isu dhexgalku waa fursad fiican oo looga hadli karo waxtarka ama awooddaada, baahidaada iyo fursadaha aad heli karto si aad dadkaaga dib uga mid noqoto.

Ayada oo lagu saleynayo arrimahaan, iyo waliba waxyaabaha aad ka heli karto IOM iyo inta la shaqo-wadaagga ah, waxaa laguu sheegi doonaa go'aanka ku aaddan sida loo hirgalin doono qorshahaaga dib dhexgalka.

**Caawinaadda dib u dhexgalka**

Caawinaadda dib u dhexgalku waxa ay dabooleysaa noocyo kala duwan oo kaalmo ah. Ayada oo loo eegayo baahidaada, waxtarkaaga, kaalmada aad horay u heshay iyo waxyaabaha aad IOM iyo dadka la shaqo-wadaagga ah ka heshay, mid ama in ka badan adeegyada soo socda ayaa lagu siin karaa:

- Tababbar waqti gaaban oo ku saabsan maamulka ganacsiga, aqoon xagga maaliyadda ah ama meela kale oo aad daneyneyso
- Kaalmo dhan maskax iyo bulsho ahaan
- Kaalmo caafimaad
- In gacan lagugu siiyo si aad waxbarasho u billaawdo ama aad tababbar xirfadeed u gasho- da'yartu ama ilmuhu si toos ah ayey qaybtaan u helaan
- Xiriirro fursado shaqaaleysiin oo markaas jira iyo gacan qabasho si shaqo laguu geeyo
- Kaalmo si aad u billaawdo ama u xoojiso ganacsi yar

Haddii ay tani tahay nooca kaalmada aad jeclaan lahayd inaad hesho,

IOM waxa ay si xooggan kuugu dhiirri-gelineysaa inaad ka fakarto "mashruuc wadareedyo" aad isla sameysataan dad ayaguna sidoo kale dib u soo noqday ama "mashaariic bulsho" oo ay leeyihiin ama wadaan dad aad isku deegaan tihiin

Kaalmo qaas ah ayaa la siin doonaa dadka u baahan dawada ama caawimaad xagga maskaxda ah, iyo sidoo kale dhibbaneyaasha la kulmay kala-iibsashada, waayeelka, guryaha ay haweenku horseedka ka yihiin iyo carruurta kaligood socdaalaya.

Caawimaadda waxaa lagu bixiyaa in laguu soo marsiiyo barnaamijyo iyo adeegyo jira oo laga heli karo dalka, ama waxa ay si toos ah uga timaad IOM iyo hay'adaha iyo dadka ay shaqo wadaagga yihiin

Suurta-galnimada aad ku heli karto adeegyada kor ku xusan ayaa ku saleysan xulasho la go'aamiyay taas oo looga hadli doono inta lagu guda jiro fadhiyada latalinta, ayada oo sidoo kalena la eegi doono xeerarka ama siyaasadaha loo baahan yahay si looga faa'iideysto. Sidaas darteed, waa muhiim in aad nala wadaagto walwalka ama walaaca aad qabto-xogtaada oo dhan waa la xafidi doonaa; waxaa la adeegsan doonaa kaliya markaad oggolaato, waxaana sidoo kale loo isticmaali doonaa arrimaha la xiriira barnaamijkaaga dib u dhexgalka.

LA XIRIIR


Mogadishu office:
Mogadishu international airport, MIA Ocean plot- near Chinese embassy,
Tel: +252613771261

Bossaso Office:
Airport Road, adjacent Daryeel Hospital,
UN-Compound

Hargeisa office:
Jig jiga yar,
behind Mansoor Hotel
Hotline number- 571211